**Adeegyada Isbeddellada Gaadiidka waxaa laga heli karaa Barnaamijyada Kharash ka-dhaafidda Adeegyada Guriga iyo Bulshada**

**Kharash ka-dhaafida:**

**Heerka Daryeelka Xarunta Daryeelka Dhexe**

- Kharash ka-dhaafida taageerada qoysaska (FSW)
- Kharash ka-dhaafida loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba naafo horumarineed, maalinta adeegyada
- Ogolaanshaha Dhameystiran ee Naafonimada Koritaanka (CDD)

**Heerka Daryeelka ee Xarunta Kalkaalisada**

- Kharash ka-dhaafida loogu talagalay dadka qaba dhaawac maskaxeed
- Kharash ka-dhaafida loogu talagalay waayeelka, dadka waaweyn, iyo carruurta naafada ah



Macluumaadka Isbeddellada Gaadiidka waxa laga helaa Xeerarka Maamulka ee Nebraska:

- Cinwaanka 403 NAC Cutubyada 4, 5 iyo 6
- Cinwaanka 480 NAC Cutubyada 5 iyo 6

**Wixii macluumaad dheeraad ah booqo:**
**https://dhhs.ne.gov/**

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska
Qaybta Naafada Korriinka

NEBRASKA
Good Life. Great Mission.
DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

# Gaadhi Wax kabadalida Guriga



DD-PAM-6 7/2025 ***Caawinta dadka inay ku noolaadaan nolol wanaagsan***

# Waa maxay Isbeddelada lagu sameeyo Gaadhi?

Isbeddellada gaadhiga waa la-qabsiyo ama wax-ka-beddello lagu sameeyo gaadhi ama baabuurka uu ka-qaybgaluhu si joogto ah ugu safro, si loogu habeeyo
baahiyaha gaarka ah ee ka-qaybgalaha. Wax ka badalida gaadhiga waxaa lagu qeexaa qorshaha adeegga si ay u awood siiyaan ka-qaybgalaha inuu si buuxda uga qaybqaato bulshada, isla markaana loo hubiyo caafimaadka, daryeelka, iyo badbaadada ka-qaybgalaha.

*Kharash ka-dhaafidyada Adeegyada Guriga iyo Bulshada ma kafaala-qaadaan wax ka badalka gaadiidka ee loo arko inay yihiin adeegyo guud, waxaayala ay tahay in uu lahaado gaariga ee ka-qaybgalaha ama milkiilaha gaadhiga, ama aan lahayn faa'iido caafimaad ama daaweyn oo toos ah. Mana kaalmayso gadashada ama kiraynta gaadhiga.*






## Noocyada wax kabadalka Gaariga

1. **Kaalmooyinka Wadista iyo Kontoroolada La-qabsiga**
   - **Qaybaha lagu xameeyo gacanta:** Bareegga iyo xawaaraha waxaa lagu shaqaysiiyaa gacmaha.
   - **Kaalmooyinka isteerinka:** Knob-yada wareega, gacan-qabsooyinka calaacalaha, iyo isteerinka juh yar ku shaqeeya.
   - **Isbeddellada caga saarka lugta:** Xawaaraha lugta bidix iyo Dheeraynta caga saarka.
2. **Helitaanka kuraasta curyaamiinta iyo skuutarrada**
   - **Kor u qaadayaasha Kuraasta Curyaamiinta iyo Ramp-yada:** Hydrauliga – ku shaqeeya dareere cadaadis ah si kor loogu qaado ama hoos loogu dhigo kursiga curyaamiinta.
   - **Isbeddellada sagxadda la dhimo:** boos gudaha ah oo dheeri ah iyo qaab gelitaan hoos loo dhigay.
   - **Kuraasta wareejinta iyo kuraasta wareega:** waxay ka caawiyaan gelitaanka iyo ka bixitaanka gaadhiga si fudud.
3. **Gelitaanka Gaadhiga iyo Fududeynta Marin-u-helidda**
   - **Albaabada korantada ah ee gadaal u jiidma:** Waxay fududeeyaan gelitaanka rakaabka qaba caqabado dhanka dhaqdhaqaaqa.
   - **Nidaamyada qaab Fogaan ahaanta laga xakameeyo:** Furitaanka Albaabada, soo saarista ramp-yada, iyo waxyaabo kale adigoo hal batoon riixaya.
   - **Xargaha iyo xajinta otomaatiga ah:** Waxay si ammaan ah u sugaan kursiga curyaamiinta iyada oo aan loo baahnayn in awoodaysan loo celiyo.

## Dheefooyinka Wax Ka badalka Gaariga

- Kordhisa madaxbannaanida iyo isku-filnaanta.
- Kordhisa marin-u-galka gaadhigaaga iyo bulshadaada.
- Waxay kordhisaa kalsooni iyo tayada nolosha.

## Yaa ka faa'iidaysan kara?

- **Qof kasta** oo u baahan qalab la habeeyey si uu ugu safro si ammaan ah oo nashaad leh.
- **Shakhsiyaadka** qaba naafo jireed, ama mid maskaxeed.
- **Waayeelada** wajahaya caqabadaha dhanka dhaq-dhaqaaqa ama caqabadaha caafimaadka,

## Helitaanka iyo Maalgelinta Isbeddellada Gaadhiga

- Wax kabadalka gaariga wuxuu u baahanyahay **qiimaynta bii'ada ee Waxkabadalka**.
- Qiimeyn shaqo oo lala sameeyo ka-qaybgalaha ayaa la dhammeystiri doonaa si loo hubiyo **caafimaadka, daryeelka, iyo badbaadada** ka-qaybgalaha.
- **Qiimeyn goobta lagu sameeyo** arrinta deegaanka waxa ay ku jirtaa qiimeynta baahida shaqo, go'aaminta bixinta isbeddelka gaadhi ee ku habboon ka-qaybgalaha, iyo qiimeynta baahida isbeddelka si loo hubiyo in uu yahay mid kharash ahaan waxtar leh.